WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD, 2021

# AF-SOOMAALI

20
21

XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND

# WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE
# XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND

Code Number

**IMTIXAANKA FASALKA 4AAD, 2021**
**AMIN: 2 SAAC IYO 10 DAQIIQO AKHRIS AH**

# AF-SOOMAALI

**TILMAAMAHA IMTIXAANKA**

- Waxaa imtixaanku ka kooban yahay 11 bog
- Tiri bogagga, hadday wax ka maqan yihiin u sheeg ilaaliyaha imtixaanka
- Haku qorin magacaaga iyo Roll lambarkaaga toona warqadda imtixaanka
- Hubi in waraaqda lifaaqu ku dhegen tahay imtixaanka, hadday kaa maqan tahay u sheeg ilaaliyaha imtixaanka.
- Lama ogola waraaqo dheeraad ah
- Jawaabtu hadday kaa qaldanto isku tallaab saar, kadibna qor tan saxda ah.

**Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay:**

| QAYBTA | DHIBCAHA |
|---|---|
| Qaybta 1aad: Sheeko | 20 dhibcood |
| Qaybta 2aad: Naxwe | 20 dhibcood |
| Qaybta 3aad: Suugaan | 30 dhibcood |
| Qaybta 4aad: Hidde iyo Dhaqan | 20 dhibcood |
| Qaybta 5aad: Curis | 10 dhibcood |
| | **Wadarta: 100 Dhibcood** |

---

**Waxaa iska leh saxaha**

| QAYBAHA | DHIBCO |
|---|---|
| QAYBTA 1AAD | |
| QAYBTA 2AAD | |
| QAYBTA 3AAD | |
| QAYBTA 4AAD | |
| QAYBTA 5AAD | |
| **WADAR** | % |

SOM EXAMS

**QAYBTA 1AAD: SHEEKO ..........................................................(20 DHIBCOOD)**

**Akhri sheekadan, dabadeedna ka warceli weydiimaha ka iman doona.**

Amintu waxa ay ahayd casarliiq ay cadceeddu baalka dhigtay. Cirka qandoodkiisa bogox waxaa isku daliigtey mood galbeed, dhanka barina waxaa ka soo gurguuranayey himsahimse gabbaldhac. Xooluhu iyaga oo **calool iyo candhoba** buuxdo ayaa ay guriga meesi meesi ugu soo fool lahaayeen. Foorida carruurta xoolaha soo carraabinayey iyo heestooda, waxa aad moodaysey fiin meel dheer ka ciyaysey. Haweenka reerkuna mid waliba hawl la soo gudboonaatey bay ku foognayd: maqal xirxirid, xaabo soo gurid, awr soo hoyn iyo weel culis.

Haddii xoolihii geelii mooyaane intii kale kambalka guriga soo hogteen, maqashiina edegga iyo mareegta u qaybsantay, ayaa rag culus oo waayeel u badnaa reer Geelle duleedka ka salaameen. Si degdeg ah ayaa gole loogu weegaaray, gogolna loogu kala bixiyey, oo wax ay afka ku dhiftaan loo keenay lana haasaawiyey, inta hilibka loo bislaynayo. Cabbaar haddii kaftan aan turxaan lahayn la isku tuurtuuray, weeye iyo waa sidaasna la kala dhammaystay ayaa hilibkii oo geedaysan la keenay. Markii hilibkii la cunay dufankiina xusullada iyo kubabka la iskaga tirtiray, waxaa lagu kala tegey habeen wanaagsan iyo waa san Alle ha inoo beriyo.

kolkii ay libdhadu big soo tiri ayaa martidii hilibkii xalay oo xarkagay iyo shaah loo keenay. Markii la quraacday dufankii hilibkana kabaha lagu **xoolaystay,** martidiina la geeyey geed aan guriga ka fogayn oo si fiican loo gogley, ayaa socotadii ujeeddadeedii u afbaxday. Warsame ayaa hadalkii furay isaga oo ku halqabsanaya Rooble oo yiri, "Rooblow waxa aannu u soo geedfadhiisanay **arrin aan maanta ugub ahayn** ee weligeedba soo taxnaan jirtey, socdaalkayaguna waxa uu ahaa Cosob Geelle in aynu ku xididno guud ahaan, gaar ahaanna Jaamac iyo Geelle". Rooble oo gabadha adeerkeed ah ayaa hadalkii qaatay oo yiri, hadalkaasi waa kii la is oran jirey, horaana loo yiri "wiil waa socde, gabadhina waa sugto" gabadhii Cosob ahaydna waanu idin siinay, intii aanu hadalku afkiisa ka soo wada bixin ayaa guddooney iyo gacan qaad loogu jawaabey. Rooble oo hadalkiisii sii wataa ayaa yiri, waxa intaas ii raaca yaradku waa intii hooyadeed laga bixiyey waana konton halaad iyo baarqab. Warsame ayaa ku jawaab celiyey yarad isagu waa ina daanweyne, waana sidaas aad u sheegtay.


©PNEB,2021
SOM EXAMS
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

## A. Goobo geli xarafka jawaabta saxda ahi ku jirto: (5 dhibcood)

1. Xilliga martidu u timid reer Geelle waxa uu ahaa:
   a. Duhur dabadii
   b. Casar hortii
   c. Casar liiq
   d. Maqrib dabadii
2. Warsame waxa uu ku halqabsaday:
   a. Cosob
   b. Rooble
   c. Jaamac
   d. Geelle
3. Waxaa Cosob yarad looga bixiyey geel tiradiisu tahay:
   a. 100
   b. 101
   c. 50
   d. 51
4. Rooble waxa uu Cosob u ahaa:
   a. Adeer
   b. Aabbe
   c. Abti
   d. Awoowe
5. Guurka noocan ah waxaa loo yaqaan:
   a. Geed fadhiisi
   b. Heeran
   c. Masaafaysi
   d. Dhabargaraac

## B. Ka warceli waydiimahan: (5dhibcood)

1. Maxaa la yiraahdaa meesha maqasha lagu xereeyo?

   ……………………………………………………………………………………………………………

2. sheeg shaqooyinkii ay dumarku hayeen, markii martidu u timid?

   ……………………………………………………………………………………………………………

   ……………………………………………………………………………………………………………

3. Maxay ahayd ujeeddada socotadu?

   ……………………………………………………………………………………………………………

   ……………………………………………………………………………………………………………

4. Maxaa la yiraahdaa xoolaha gabadha la guursadey reerkooda la siiyo?

   ……………………………………………………………………………………………………………

5. Maxaa looga jeedaa "kaftan aan turxaan lahayn ayaa la isku tuurtuuray"?

   ……………………………………………………………………………………………………………



©PNEB,2021

SOM EXAMS

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**C. Erayadan kuwa la macne ah ka soo saar sheekada (4 dhibcood)**

1. Cadceed:
2. Bogox:
3. Dheelmayey:
4. Fagaag:

**D. Sharrax weedhahan (6 dhibcood)**

1. Arrintu ugub maaha.

..........................................................................................................................................

..........................................................................................................................................

2. Xooluhu calool iyo candhoba waa ay buuxeen.

..........................................................................................................................................

..........................................................................................................................................

3. Dufankii hilibka kabahaa lagu xoolaystay.

..........................................................................................................................................

..........................................................................................................................................

**QAYBTA 2AAD : NAXWE ........................................................ (20 DHIBCOOD)**

**A. Magacyada hoosta ka xarriiqan ku bedel magac u yaallo abyoon: (3 dhibcood)**

1. <u>**Cali**</u> ayaa ku baray casharka. ..........................................
2. <u>**Caasha**</u> ayaa i tustay jidka. ..........................................
3. <u>**Aabbe iyo hooyo**</u> ayaa ku jecel. ..........................................

**B. Ku buuxi meesha bannaan magac u yaalka abyoon ee ku habboon: (3 dhibcood)**

1. ........................ way na caawiyaan.
2. ........................ ima garanayo.
3. ........................ hooyadeed ayaa ay kaalmaysaa.


©PNEB,2021

SOM EXAMS
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**C. Ku buuxi meesha bannaan mid ka mid ah xiriiriyayaasha bilaha ku jira: (4 dhibcood)**

(hase yeeshee-- ama-- iyo-- ee)

1. Kani waa imtixaankii ………………….. iska hubi.
2. Xaawo waxa ay jirtaa dugsiga ………………….. guriga.
3. Barihii wuu yimid ………………….. ilama hadlin.
4. Aabbahay ………………….. hooyaday waan u duceeyaa.

**D. Ka soo saar weedhahan falalka ku jira: (4 dhibcood)**

1. Casharkii waan qoray. …………………..
2. Bahalka dil. …………………..
3. Hashii buu lisay. …………………..
4. Ardaydu way dedaalaysaa. …………………..

**E. Wadaree magacyadan: (2 dhibcood)**

1. Dab:
2. Dabar:
3. Lax:
4. Ciddi:

**F. Magacyadan kelida ah ku dar qodobo (4 dhibcood)**

1. Faras
2. Fure
3. Loox
4. Mindi



©PNEB,2021

SOM EXAMS
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**QAYBTA 3AAD: SUUGAAN ………………………………………(30 DHIBCOOD)**

**1. Tuducyada hoos ku qoran ka soo saar afmaldaha ku jira (4 dhibcood)**

(Sillansugan--- Buunbuunin --- Ekeeye—Qofayn)

1) Guuguulihiiyow haddaad gu'ga u ooyayso (………………………………)
2) Hadday maqan tahay magaalada dhan, mugdi weeyoo way madowdee (………………………………)
3) Waxan ahay nin araggaaga neceb aadna kuu jecele (………………………………)
4) Sidii aad go'aygiyo tihiyo maradii aan goostay
   Gardarriyaa maxaan Hodon Cabday kaaga go'i waa yey. (………………………………)

**2. Gabayo (6 dhibcood)**

➢ **Akhri gabaygan dabadeedna ka warceli weydiimaha**:

Ridaan badhaha jiilaal ku furay buurta dhaladeeda
Een baarqab le'kow orgiga ba'an ku siidaayey
Ee waxarta beyga leh dhashaan bidix ku laadlaadshey
Een buqulka caana ah ka dhamay sidigti oo biistay
Miyaa boojo geel lala simaa? bixiso weeyaane

1) Meesigee ayuu gabyaagu ammaanayaa? **(1 dhibic)**

……………………………………………………………………………………………………

2) Waa maxay sidigtu? **(1 dhibic)**

……………………………………………………………………………………………………

3) Gabyaaga waxaa lagu dhalliilay tuduca labaad, haddaba caddee maasha ay iintu kaga jirto. **(2 dhibcood)**

……………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………


©PNEB,2021

SOM EXAMS

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

- Gabayga hoos ku qoran waxaa ku jira **tuduc aan ka mid ahayn.** Haddaba, adiga oo ka duulaya qaafiyadda ama xarafka gabaygu ku socdo, ka soo saar tuducaas. **(2 dhibcood)**

Hanka duniyadeed waa intaad gelinba haysaaye

Hal haddii aad leedahay labaad ku hindisootaayee

Hirkii kaa dhammaadaa mid buu kaa hor bixiyaaye

Gam'i waayey Soomaaliyey gocashadiiniiye

### 3. Hees hawleed (6 dhibcood)

Isku aaddi hees hawleedka iyo cidda leh:

(idaha ---- riyaha --- geela – cawska --caana lulka—salsalka)

| | Cidda leh | Hees hawleedka |
|---|---|---|
| 1 | | Qaayib qolada leh, jeer uu qun u dhalo, oo nirgaha qubo, quulle dubudkiyo, qiiqu kama hadho. |
| 2 | | Dhega yare dhedaa qubataye, bal aan dhaxanta kaa dedo. |
| 3 | | Waa beela ceebeede, yaan subagga lay bidine, yaan soo bax lay orane, baayeey buloy ii bax. |
| 4 | | Golxo gabaydaye, Galaalo cidaye, ma gu' baw da'a y, mise gabaniyo, gabdha maalay, guryo ku ogayd. |
| 5 | | Gabaarre orgigu, ma ku goohoo, ma ku gaardiyey, ma gelin kacay. |
| 6 | | Cawskayga wiil qaaliyoo u qalma mooyaane, wallee qudhunle iyo qaad nin cuna qol ugu goyn mayo. |



©PNEB,2021

SOM EXAMS
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**4. Goobo geli xarafka jawaabta saxda ahi ku jirto: (4 dhibcood)**

1. "Far keliyi fool ma dhaqdo" maamhdan waxaa loo adeegsadaa:

   a. Aqoonta
   b. Deeqda
   c. Iskaashiga
   d. Geesinimada

2. Maansada qaybaheehada waxaa ugu sarreeya:

   a. Gabayga
   b. Guurowga
   c. Geeraarka
   d. Buraanburka

3. "Gammaankiina badan Faytinow gobolba waa cayne" erayga "gammaan" waxaa loo adeegsadey sarbeeb ahaan, waxaana loola jeedaa:

   a. Fardihiina
   b. Gabdhihiina
   c. Geeliina
   d. Hantidiina

4. Heesta awrta lagu raro waxaa la yiraahdaa:

   a. Maanyo
   b. Giis
   c. Salsal
   d. Sarsar

**E. Halxidhaale Iyo Googaalaysi (4 Dhibcood)**

**Ku aaddi jawaabaha bilaha ku jiraa meesha ay ku habboon yihiin:**

( Sonkorta-- daadka – caloosha hooyadii—gulgulada/doobta)

1. Waa meelma meesha geelu sannad maro oo aanu sannad labaad marin?

.......................................................................................................................................

2. Silsilad qubatay sidee baa loo guraa ?

.......................................................................................................................................

3. Ida Jeerin galay yaa jeedin kara?

.......................................................................................................................................

4. Waa kuma cadka marka geela la qalo laga waayo?

.......................................................................................................................................


©PNEB,2021

SOM EXAMS
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**F. Min hal maahmaah ka keen (6 dhibcood)**

1. Guurka:

……………………………………………………………………………………………………………

2. Fardaha:

……………………………………………………………………………………………………………

3. Sagaarada:

……………………………………………………………………………………………………………

**QAYBTA 4AAD: HIDDE IYO DHAQAN …………………… (20 DHIBCOOD)**

**A. Goobo geli xarafka jawaabta saxda ahi ku jirto(6 dhibcood)**

1. Neefka lo'da ah ee guduudan waxaa la yiraahdaa:
   a. Dhiin
   b. Careef
   c. Giir
   d. bey
2. Ragga xoolaha ka hor mara si ay ugu sii diyaariyaan kaalinta iyo agabka, waxa la yiraahdaa:
   a. Sahan
   b. Ceelalyo
   c. Horseed
   d. Raacdo
3. Faraska midabbo badan oo isku jira leh, waxaa loo yaqaan:
   a. Ashkir
   b. Xamar
   c. Caynab
   d. Baroor
4. Ugaadha waxaa loo qaybiyaa ishin iyo:
   a. Yaris
   b. Garanuug
   c. Ishin
   d. Deero
5. Neefka irmaan ee ilmahii soo gaadhaaaba nuugo, waxaa la yiraahdaa:
   a. Hebed
   b. Hayin
   c. Dhaaqo
   d. Tood


©PNEB,2021

SOM EXAMS

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

6. Dhigaha, udbaha, kabaalada iyo loolka aqal Soomaaliga waxaa la isku yiraahdaa:
   a. Saari
   b. Gurgur
   c. Ded
   d. Qabax

**B. Erayada shaxda ku jira ku hor qor weedha ay la macnaha yihiin: (4 dhibcood)**

| | | | |
|---|---|---|---|
| Gandaal | Maydi | Taxaab | Madi |

1. Faraska la hogaaminayo ee aan la fuushanayn. ................................................
2. Neef aad u caana badan. ................................................
3. Mid ka mid ah xabkaha aynu dhoofino. ................................................
4. Maqaarka lagu maalo saca ilmihiiso dhinto. ................................................

**C. Ka war celi weydiimahan (20 dhibcood)**

1) Sheeg hal wax oo aadanuhu ka bartay shimbiraha.

........................................................................................................................................

2) Laba ka sheeg sababaha jiinguuriyey ugaadhii Soomaalida.

........................................................................................................................................

3) Noocyada guurka Soomaalidu waa toddoba, waxaana ka mid ah: geedfadhiisi, masaafaysi, heeran, dhabargaraac, godobtir. Haddaba ku dar labada ka maqan.

........................................................................................................................................

4) Laba ka sheeg waxyaalihii kicin jirey colaadda Soomaalida.

........................................................................................................................................

5) Maxaa la oran jirey faraskii uu Sayid Maxamed siiyey Islaan Faarax?

........................................................................................................................................


©PNEB,2021

SOM EXAMS
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

6) Guurka noocee ah ayaa loo yaqaan Heerin?

……………………………………………………………………………………………………………………………

7) Maxaa la yiraahdaa weelka haragga ka samaysan ee caanaha lagu shubto?

……………………………………………………………………………………………………………………………

8) Maxaa la yiraahdaa dhasha lo'da?

……………………………………………………………………………………………………………………………

9) Maxaa la yiraahdaa shinbirta colaadda ka digta?

……………………………………………………………………………………………………………………………

10) Laba ka sheeg cayayaanka iskaashigooda wax ku qabsada.

……………………………………………………………………………………………………………………………


©PNEB,2021

SOM EXAMS
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**QAYBTA 5AAD: CURIS ...............................................(10 DHIBCOOD)**

Ka qor curis, dhibaatada dhaqaale, qoys iyo caafimaad ee qaadku ku hayo dalkeenna ugu yaraan 15 sadar.

Waxaa lagaa qiimaynayaa:

1. Mawduuca 2 dhibcood
2. Farta 2 dhibcood
3. Astaamaynta qoraalka 2 dhibcood
4. Isku xidhnaanta curiska 2 dhibcood
5. Adeegsiga erayada iyo weeraha culus 2 dhibcood

..................................................................................................................................................

..................................................................................................................................................

..................................................................................................................................................

..................................................................................................................................................

..................................................................................................................................................

..................................................................................................................................................

..................................................................................................................................................

..................................................................................................................................................

..................................................................................................................................................

..................................................................................................................................................

..................................................................................................................................................

..................................................................................................................................................

..................................................................................................................................................

..................................................................................................................................................

..................................................................................................................................................

..................................................................................................................................................

..................................................................................................................................................

..................................................................................................................................................

..................................................................................................................................................

..................................................................................................................................................


©PNEB,2021

SOM EXAMS

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com